

# Waxa Aad Samaysaa Marooxad Filter leh

## Nadiifinta hawada gudaha gurigaaga

### MAROOXADA FILTERKA LEH WAXA AY KA CAAWIN KARTAA HAWADA GURIGA DHAXDIISA INAY NADIIF NOQOTO OO AY CAAFIMAAD QABTO.

Hal darioo oo fudud oo la awoodi karo ayaa ah inaad nadiifiso hawada gurigaaga adiga oo isticmaalaya marooxa saxaarada ah iyo filterka. "Marooxadan filterka" leh waxa lagu xidhi karaa meel yar taas oo caam ku ah dabka kaynta ama qiiqa kaynta. Wasakhda la taaban karaa waxay horseedi kartaa saamayn caafimaad faro badan oo mudada gaaban iyo mudada dheer ah sida neefsiga oo ku dhiba, xiiq, iyo sanbab iyo wadne xanuun. Wasakhda la taaban karaa waxay si gaar ah khatar ugu tahay caruurta, dadka waayeelka ah iyo dadka qaba xanuunada difaaca jidhka wiiqiya.

### SIDEE AYUU U SHAQEYYAA MAROOXADA FILTERKA LEHI?

Marooxadu waxay nuugtaa hawada oo ay marisaa filterka, waxayna qabataa dhaska, wasakhda iyo wixii kale ee qurubyo ah. Hawada nadiifta ahi waxay kasoo gashaan banaanka. Waaad filter ku xidhmaa dhabarka marooxada taas oo lagu xaqiijinayo falaadha marooxada. Kadibna waxa aad shidaa marooxada.


### SIDEE WEEYE WAXTARKA MAROOXADA FILTERKA LEHI?

Waxa aanu qiyasaynaa heerarka wasakhda hawada oo afar guri ah deegaanka Puget Sound si aad wax badan uga ogaato sida filteradani u shaqeeyaan. Qolalka yaryar, ee leh daaqadaha iyo albaabada xidhan, waxaa la ogaaday inuu yareeyo ilaa 90% wasakhda hawada.

Marka si sax ah loo isticmaalo, qolalka yaryar waxaa lagu nadiifin karaa 15 daqiqo ama wax ka yar. Marooxada leh filterku ma nadiifin karto qolalka waawayn, laakiin waxa la dhigi karaa meel kuu dhaw.

Waxaa muhiim ah in albaabada iyo daaqaduhu xidhnaadaan marka la isticmaalayo marooxada filterka leh. Waxay taasi baajisaa in hawada wasakhda ahi ay guriga dib usoo gasho.

### Waxqabadka Marooxada Filterka leh



# Waxa Aad Samaysaa Marooxad Filter leh

## TILMAAMAH AAD ISTICMAALKA MAROOXADA FILTERKA LEH

Marooxada saxaarada ku jirta looguma talo gelin in lala isticmaalo filterada oo amaanka ahaan marooxada filterka leh lama tijaabin karo. Waxa aad xaqiisaa inaad raacdo tilmaamahan:

- Waxa aad ku isticmaashaa marooxada qolka aad wakhtiga ugu badan joogto.
- Waxa aad dhigtaa marooxada badhtamaha qolka, meel ka fog gidaarka iyo shayada waawayn. Ha u dhawaynin marooxadan aaga dhaska ama wasakhda ah ama marooxadu waxay ku buufin doonaa dhaska hawada.
- Waxa aad xidhaa dhamaan daaqada iyo albaabada inta aad isticmaalayso marooxada. Filterka lama nadiifin karo hadii wasakhda banaanku ay dib usoo gasho qolka. Laakiin, hadii uu guduuhu aad u kulul yahay waxa aad furi kartaa daaqada oo waxa aad shidi kartaa marooxada adiga oo aan filterka isticmaalin.
- Waxa aad isticmaashaa marooxada ugu yaraan 10–15 daqiiko marka loo baahdo.
- Amaanka elektorooniga, ma ku isticmaalin marooxada meel u dhaw suuliga ama biyo.
- Waxa aad bakhtiisaa marooxada mararka qaar si aad uga hortagto in ay kululaato.
- Waxa aad bakhtiisaa marooxada marka aad qolka ka baxayso.
- Ha isticmaalin inta aad hurudo ama aanad guriga joogin.
- Waxa aad badashaa filterka 3 billoodba mar ama marka uu wasakhoobo.
- Filter garayntu waa inay yeelataa "Qiimaynta MERV" ee 13.
- **Marka aad ogolaato filterka marooxada, isticmaaluhi waxa uu ogolaaday masuuliyada isticmaalka, hagaajinta, iyo shaqada filterka marooxada ee Hay'ada Nadiifinta Hawada Puget Sound.**

## GOORMA AYAAD ISTICMAALI KARTAA FILTERKA MAROOXADA?

- Hadii hawada banaanku ay leedahay qiiq ama dhas. Inta uu socdo iyo kadib wixii abuuri kara wasakh gudaha ah, sida sigaar cabista, cunto karinta, ama wixii gubadaha ama shamaca.
- Amaanka dartiis, marooxadaha waa in aan la isticmaalin hadii aanay cidha joogin guriga ama marka ay dadku wada hurdaan.
- Ha isticmaalin marooxada leh filterka hadii ay daaqaduhu furan yihiin.



## TILMAAMAH XIDHXIDHIDA

Waxaa jira laba nooc oo aad ku samaysan karto guriga, mid waxa uu isticmaa qabatin bir ah oo leh boolal oo midba waxa uu u isticmaalaa caag soo qabta oo mala tuul.

Tilmaamaha daabacan ee sida loo xidhxidhayo waxaa ay ku qoran yihiin bushqada marooxada filterka leh.

Waxa aad sidoo kale laga heli kartaa  
[pscleanair.gov/filterfan](http://pscleanair.gov/filterfan)